MIISAANIYAD LOOGU TALAGALAY ONTARIO OO BARWAAQO IYO CADAALAD AH

Dawladda Cusub ee Ontario waxay gacan ka geysaneysaa Abuuridda Shaqooyinka iyo taageeridda Dadka

WARARKA Maajo 2, 2013

Misaaniyadda Ontario ee 2013 — Ontario Barwaaqo iyo Cadaalad ah —ayaa samaysa maalgashiyo wanaagsan oo xoojin doona dhaqaalaha, gacanna ka geysan doona abuuridda shaqooyin loogu talagalay dhallinyarada, waxna ka qaban doonta sidii loo baabi'in lahaa hoos u dhaca miisaanidda markay tahay 2017-18.Misaaniyadda Ontario ee 2013 waxay ku talineysaa Ontario oo Barwaaqo iyo cadaalad ah iyada oo:

- La dejinayo Xeeladda Shaqooyinka Dhallinyarada oo ah $295 milyan muddo labo sano ah si fursado shaqooyin iyo gacan-qabasho loogu abuuro qiyaastii dhallinyaro gaareysa 30,000 korna loogu qaadi lahaa meherad-wacnida iyo wax cusub soo saarka
- Shaqooyin lagu abuurayo maalgashiyada kaabayaal loogu talagalay tareenka dadweynaha, waddooyinka iyo buundooyinka , isbitaallada iyo dugsiyada
- Sagaal malyuun oo darawal hoos loogu dhigayo xaddiyada caymiska celcelis ahaan boqolkiiba 15.
- 46,000 oo dad dheeraad ah looga caawinayo sidii ay si dhakhso ah ugu heli lahaayeen daryeel guri iyo mid bulsho iyo guri iyaga uun ku habboon .
- Cashuurta laga yareynayo meheradaha yar-yar si loo abuuro shaqooyin badan iyadoo Cashuur dhaafka Caafimaad ee Shaqaaleyahooda la kordhinayo lagana dhigayo $450,000 halkii ay ka ahayd $400,000.
- Tallaabooyin la qaado si gargaarka bulsheed (caydha) loogu beddelo in dad badan oo qaata caydhu ay u helaan shaqooyin loona sugo arrimahooda lacageed.

Hoos u dhaca maaliyadeed ee 2012-13 ayaa hadda lagu qiyaasay inuu noqdo $9.8 bilyan — kor u kac dhan $5.0 bilyan marka loo eego saadaalintii miisaaniyaddii 2012. Miisaaniyad sannadeedka hadda dhammaatay ayaa tilmaamaysa sannadkii afraad ee isku daba xigay ee gobolku ka warbixiyay hoos u dhac maaliyadeed oo ka hooseeya sidii la saadaaliyay —waa dawladda kaliya ee Kanada gaartay heerkan guusha ah. Kobaca kharashka ku baxa barnaamijyada ayaa lagu qiyaasayaa inuu ka yaraado boqolkiiba hal sannadkii labaad ee isku xigay.

../2

Ka badinta bartilmaameedka loogu talagalay 2012-13 waxa intaa u dheer, gobolka oo saadaalinaya kor u kac ka badan $1.0 bilyan marka loo eego hoos u dhicii maaliyadda ee ahaa $12.8 bilyan ee loo saadaaliyay Miisaaniyaddii 2012 ee loogu talagalay 2013-14 Kharashka ku baxa i barnaamijyada ee 2013-14 ayaan iska beddelin saadaalintii Miisaaniyaddii 2012. Inta ka dambeysa 2013-14, ayay dowladdu jid toosan ugu jirtaa sidii ay uga soo bixi lahayd bartilmaameedyada hoos u dhaca maaliyadda ee lagu tilmaamay Misaaniyaddii 2012 oo ay ku guulaysato inay uga soo haraan $0.5 bilyan oo dheeraad ah 2017-18.

Iyada oo wadaageyaasheeda kala shaqeysa , dawladda ayaa dejineysa qorshe dib-cusbooneysiin dhaqaale lix-qaybood ah oo ka caawin doona dhaqaalaha Ontario sidii ay u haleeli lahayd fursadaha cusub ee loogu talagalay kobaca iyo shaqo abuurka:

1. **Jawi ganacsi oo tartan geli kara** —Taageeridda nidaam canshuur tartan geli kara iyo qawaaniin wax-ku-ool leh ayaa horumariya maalgashiga ganacsiga cusub ee loogu talagalay shaqo abuurka iyo Kobaca dhaqaalaha
2. **kaabayaal casri** — iyada oo la maalgashado gaadiidka dadweynaha , waddooyinka, dugsiyada iyo isbitaallada oo u ah aasaas muhiim ah dhaqaalaha wax soo saarka badan.
3. **xoog-shaqaale oo si sarreysa xirfad u leh** — iyada oo la maalgashado xirfadaha iyo waxbarashada , iyo waliba abuurka shaqada loogu talagalay dhallinta, ayaa hubineysa inay dadka gobolku shaqayn karaan oo ay barwaaqoobaan.
4. **kor u qaadidda meherad-wacnida iyo wax cusub soo saarka** —xoojinta kartida Ontario ay u leedahay inay u beddesho fikradaha bucshirado iyo adeegyo cusub oo loogu talagalay dhaqaalaha caalamiga ah.
5. **caalami noqosho** — iyada oo lagala shaqeeyo meheradaha sidii ay u fidin lahaayeen marin u helkooda suuq ee bucshiradaha iyo adeegyada waxa ka baxsan xuduudka Ontario ee ah gobollada kale, Maraykanka iyo dhaqaalayaasha soo kobcaya.
6. **bulshooyin kobcaya oo xoog leh** — iyadoo dhammaan bulshooyinka iyo dhaqaalayaasha deegaaneed lagu caawinayo in ay ka faa'iideystaan shaqo abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.

Dawladda cusub ayaa waliba ku sii wadi doonta inay tallaabooyin u qaaddo sidii ay u siin lahayd taageerooyin ka sii badan qoysaska Ontario. Waxay horumarin doontaa fursadaha loogu talagalay dadka Asalka dalka ku ahaa, iyo in la badbaadiyo kuwa ugu jilicdasan, iyo in la dhiso beelo ka sii amni fiican oo ka sii adakaan badan.

Miisaaniyadda Ontario ee 2013 ayaa dhisi doonta Ontario caddaalad iyo barwaaqo ah oo looguna talagalay waxtarka dadka oo idil.

XIGASHOOYIN

“ Dawladda cusub ayaa u heellan sidii ay u caawin lahayd dadka Ontario oo idil iyo sidii loo baabi’in lahaa hoos u dhaca maaliyadda markay tahay 2017-18. Annaga oo ka adkaana bartilmaameedyada miisaaniyadeed, ayaan ku sii wadi karnaa inaan maalgashano waxyaabaha ugu qiimaha badan dadka maalin kasta. Waxaan badbaadineynaa daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada.

Waxaan abuureynaa fursado shaqo loogu talagalay dhallinyarada. Qaab wax qabadkeenna isu dheelli-tiran ee lagu xoojinayo dhaqaalaha ayaa waxtar u yeelan doonta abuurka shaqooyinka oo u dhisi doonta Ontario barwaaqo iyo caddaalad qof kasta.”

— Charles Sousa, Wasiirka Maaliyadda (Minister of Finance)

XAQIIQOOYIN DHAKHSO LEH

- Dawaladda ayaa saadaalineysa kobaca dhabta ah ee wax soo saarka guud ee waddanka (GDP) inay noqdaan boqolkiiba 1.5 gudaha 2013, boqolkiiba 2.3 gudaha 2014, iyo 2.4 boqolkiiba markay yihiin 2015 iyo 2016 labadooduba.

- Dawaladda ayaa kala tashatay ka hor miisaaniyadda in ka badan 1,000 ururro ra'yina ka heshay reero gaaraya 600,000 kana tirsan bulshooyinka ka soo jeeda Ontario oo idil muddo shirar taleefan dadweyne la qabtay.

- Ontario ayaa hadda ka midah labada dawaladood ee kaliya gudaha Kanada ee jidka toosan ugu jira inay ka reeyaan bartilmaameedka miisaaniyaadda loogu talagalay 2012-13. Natiijooyinka ayaa ku yimid awgeed dawladda oo ku nuuxnuuxsatay baabi’inta difisidka illaa 2017-18 — u heellanaanta ay xoojineyso yoolka lagu naaqusayo deynta GDP ee ka horreysay heerkii khalkhalka dhaqaale ee ahaa boqolkiiba 27 marka misaaniyadda la dheellitiro.

- Ontario ayaa abuurtay ku dhawaad 400,000 shaqo illaa Juun 2009, iyada ka soo kabatay dhammaan shaqooyinkii lagu waayay dhaqaale hoos u dhicii. Heerka xaadirkan ee shaqo hayntu waa 130,000 shaqo in ka sarreysa bartii ugu sarreysay ee ay ahayd kahor dhaqaale hoos u dhicii.

- Maalgashiyada kaabayaasha qorshaysan ee Ontario ee ah in ka badan 35 bilyan muddada saddexda sannadood ah ayaa taageeri doonta 100,000 oo shaqo marka la isku celceliyo sannad kasta.

- Dawaladda ayaa horay ugu dhaqaaqaysa boqolkiiba 60 talooyinkii 362 ahaa ee ka yimid Guddiga Waxa Ka Beddelka Adeegyada Dadweynaha ee Ontario (Commission ON the Reform of Ontario) iyo daraasaddaynta hirgalinta inta hartay.

WAX BADAN KA BARO ARRIMAHA

Akhriso Misaaniyadda

Daawo qudbadda Miisaaniyadda

Daawo sawirradda Misaaniyadda

Akhriso macluumaadka arrimaha miisaaniyadda wixii laga soo maray:

- Aragtida Dhagaale iyo Qorshaha Miisaaniyadeed ee Ontario
- Ka Caawinta Darawallada Ontario Sidii Ay U Dhagaalaysan Lahaayeen Lacagta
- Bulsho Cadaalad ah
- Dheefta Ontario Trillium (Ontario Trillium Benefit): Xulasho Badan Oo Loogu Talagalay Dadka
- U Abuurka Shagada Dhallinta

Akhriso Qaybaha Ugu Muhiimsan ee Miisaaniyadda

WAXAA LOOGU TALAGALAY XOG WEYDIINTA *I*ARBAAHINTA KALIYA
Susie Heath, Xafiiska Wasiirka (Minister's Office), 416-325-3645
Scott Blodgett, Wasaaradda Maaliyadda (Ministry of Finance), 416-325-0324

MARKAY TAHAY WEYDIIMAHA DADWEYNAHA SOO WAC:
1-800-337-7222
TTY (waxaa loogu talagalay dadka dhagaha wax ka qaba): 1-800-263-7776